



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Telephone: 0612008723. E-mail: info@sonsaplatform.org website: www.sonsaplatform.org

BAAQ

WALAACA URURADA BULSHADA EE KU AADAN SHARCIGA DOORASHOYINKA

09 February 2020: Dallada Bulshadda Rayidka ee SONSA oo horay loo oran jiray SOSSENSA kuna mideysanyihiin Ururada Bulshada Rayidka, Ganacsatada iyo Xirfadleyda, waxa ay welwel iyo walaac ka muujinayaan sida mudanayaasha labada aqal ay isaga dhago tireen talooyiinkii iyo aragtida Bulshadda Rayidka iyo qaybihii kala duwanaa ee ka qayb galay wadatashiga diyaarinta shariga doorashooyinka. Waxaa nasiib daro ah in mudanayaasha labada aqal oo la aaminsan yahay in ay matalaan bulshada aysan wax tixgelin ah siinin talooyinka bulshada rayidka ee ku aadan sharciga doorashooyinka iyaga oo ka hormariyey rabitaankooda danta bulshada .

Dallada SONSA waxa ay cadayneysaa in sharcigaan uusan suurtagal ka dhigeynin in doorashada 2020/21 loo isticmaalo sababo badan oo jira aawgeed. Sababahaas waxaa ka mid ah:

- Waqtiga ka dhiman xiliga doorashada oo aan ku filneyn in lagu shaqeeyo sharcigaan.
- Sharcigaan waxa uu qasab kadhigayaa in kursi kasta deegaankiisa lagu doorto, taas oo ay hada muuqato in deegaano badan doorasho aan lagu qaban Karin.
- Waxaa lagama maarmaan ah in tira koob la sameeyo, taasna xiligaan suurtagal maahan.
- Sharcigaan ma suurtagalinaayo in bulshada Soomaaliyeed si siman uga qayb qaataan doorashooyinka 2020/21, waxa uuna xooga saarayaa awood qaybsi qabiil kudhisan.
- Ugu dambeyn sharcigan waa mid aanan xaqiijineynin kuraasta haweenka ku yeelan doonaan golaha baarlamaanka.

Dalladu waxa ay dhowr jeer la kulantay labada gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyagoo la wadaagey arrimaha aan kor ku soo sheegnay balse nasiib daro waxaa muuqata in aan la tixgalin ama la marin habaabayay aragtiyadii ay soo gudbiyeen ururada bulshada rayidka.

Sidaas darteed, Dalladu waxa ay ka codsanaysaa madaxweynaha dowlada federaalka in uusan saxiixin sharcigaan isla markaasna uu mudnaanto siiyo bulshada Soomaaliyeed oo walaac ka qabto sharciga doorashada oo ay labada gole gudbiyeen.

Wabilaahi Towfiiq

